

Waa imisa?

Elderplace/PACE waxa ay dabari doontaa dhamaan wixii caafimaadka daruuriga ah, daryeelka mudada dheer, iyo adeegyada bulshada. Hadii dhaqaale ahaan aad u qalanto adeegga Medicaid, Medicaid ayaa kaa bixinaysa si aad barnaamijka ugu jirto.

Dhamaan adeegyada la ogolaaday waa laga bixinayaa iyaga oo dhamaystiran kaqaybgalayaasha PACE. Kaqaybgalayaasha PACE waa inay qaataan daryeelka caafimaadka ee loo baahan yahay, oo ay ku jiraan daryeelka kowaad iyo adeegyada dhakhaatiirta khabiirada ah (wixii aan ahayn adeegyada xaalada degdegga ah) oo ay ka helaan hay'ada PACE ama hay'ad ay ansixisay hay'ada PACE. Kaqaybgalayaasha PACE waxa ay si buuxda oo shakhsi ahaaneed uga masuul yihiin kharashka wixii aan loo ansixin ama adeegyada ka baxsan PACE. Xaalada degdegga ah waa la bixinayaa.

Portland metro 503-215-6556

Clatsop/Tillamook 503-717-7150

Taleefan bilaash ah 1-855-415-6048

TTY / dadka dhagaha culus

1-800-848-4442

providence.org/elderplace

Providence ElderPlace/ PACE waxa uu u furan yahay qof kasta oo ah:

- da'da 55 ama ka wayn;
- ku dhax noolaan kara bulshada;
- u baahan adeegyada dhaqdhaqaaqa, garaadka iyo/ama isticmaalka musqusha;
- deggan aagga adeeggeena;
- u qalma Medicaid ama diyaar u ah inuu gaar iskaga bixiyo (kharashka caymiska ElderPlace oo u dhigma xadiga Medicaid).

Naga soo wac **503-215-6556**.

Khabiirka macluumaadka ayaa ku siin doona faahfaahinta ku saabsan tilmaamaha gobolka iyo u qalanka.



SHAQADA

Sida ay sheegayaan jacaylka bogsashada ee Ilaahay, oo lagu arkay boqortooyada Ciise oo dhan, waxaannu samir u leenahay u adeegidda dhammaan, gaar ahaan kuwa saboolka ee liita.

QIYAMKA

Naxariista, Sharafta, Cadaalada, Wanaaga, Daacadnimada



Dadka kuma samayno takoor ku salaysan isir, midab, dalka laga soo jeedo, jinsi, da', ama naafonimo barnaamijyada iyo hawlaha caafimaadkayaga.


ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 855-415-6048 (TTY:711).

CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 855-415-6048 (TTY: 711).

CMS Apprvd 04252019_20200214

Providence ElderPlace/PACE

Barnaamijka Daryeelka loo Dhan yahay ee Waayeelka



Daryeel dhammaystiran, la fududeeyay

Providence ElderPlace waa barnaamij Daryeelka loo Dhan Yahay ee Waayeelka (PACE), barnaamij laga aqoonsan yahay federalka kaas oo bixiya daryeel dhammaystiran oo joogto ah. ElderPlace/PACE waa caymis caafimaad iyo daryeel caafimaad bixiye labadaba.

Kaqaybgalayaashu waxay si caadi ah oo joogto ah uga helaan xiriir koox dhinacyo badan qaabilsan oo ah bixiyayaal daryeel caafimaad iyo bulsho kuwaas oo isku duba rida oo siiya daryeelkooda. Xidhiidhka joogtada ah iyo qaabka kooxda waxay ka dhigan tahay in isbadalka yar ee caafimaadka iyo badqabka laga jawaabi karo.

GUNADA	WADA-BIXIN	FAAHFAAHINTA
Daryeelka caafimaadka kowaad	\$0	Dhakhtarka leh khibrada daryeelka dadka waawayn.
Daryeelka caafimaadka takhasuska ah	\$0	Daryeelka caafimaadka takhasuska ah sida wadnaha, sanbabka iyo lafaha, sida loogu baahdo.
Daryeelka Ilkaha/Araga/Maqalka/Cagaha	\$0	Daryeelka kahortagga iyo daawaynta sida uu dhigayo qorshahaaga daryeelku.
Qorshaynta daryeelka isku duba ridan iyo daryeelka la badbaddali karo	\$0	Iyada oo ku salaysan baahidaada gaarka ah iyo yoolashaada daryeelka caafimaad.
Dawada, agabka caafimaadka iyo qalabka	\$0	Waxaa kamid ah dawada la qoro iyo dawada aan la qorin iyo dhamaan twixii agab caafimaad ah ee daruuriga ah.
Daryeelka guriga	\$0	Daryeelka shakhsi ahaaneed ee gurigaaga, sida kaalmada maydhashada, dhar xidhashada, iyo nadaafada guriga.
Daryeelka caafimaadka guriga	\$0	Waxaa kamid ah daryeelka kaaliyayaasha caafimaad ee guriga iyo adeegyada baxnaaninta.
Guryaynta taageero	\$0	Shurakada dhamaan heerarka daryeelka, oo ay ku jiraan nolosha la kaalmeeyo, daryeelka guriga, guryaha daryeelka dadka waawayn iyo xarumaha daryeelka xasuusta.
Xarumaha maalintii dadka waawayn lagu hayo	\$0	Booqashooyinka xarumaha caafimaadka iyo bulshada ee cuntada, hawlaha iyo taageerada bulsho.
Daawaynta jidh, shaqo iyo hadal	\$0	Dhamaan daawayn baxnaaninta waxaa lagu bixiyaa sida uu dhigayo qorshahaaga daryeelku.
Dhigista isbitaalka iyo qalliimada caafimaad	\$0	Waxaa kamid ah daryeelka bukaan jiifka iyo bukaan socodka.
Gaadiid raaca	\$0	Gaadiidka, oo ay iskugu kaa duba rideen kooxdaada daryeelku, ee loo sii raacayo ama laga soo raacayo xarumaha bulshada iyo kuwa caafimaadka iyo balamaha caafimaad.
Daryeelka degdegga iyo gurmada degdeg ah	\$0	Dhamaan daryeelka gurmada degdegga ah iyo caymiska bixiyaha heeganka ah 24/7.

Kooxdaada dhinacyada badan qaabilsan:



Daryeel bixiyaha kowaad



Kaalkaaliye caafimaad oo duwaan gashan



Adeegaha bulshada



Isku duwaha hawsha



Dhakhtarka Cuntada



Daawaynta jidhka



Bixiyaha caafimaadka maskaxda



Farmasiilaha



Isku duwanaha daryeelka guriga



Dirawalka baska/gaadhiga qafilan



Daawaynta shaqeed



Wadaadka kiniisadda



Kaalmada daryeelka shakhsi ahaaneed



Maamulaha xarunta daryeelka maalintii